Digtoonow. Qurux Ahow.

Ka ilaali sun indhakuushaada



DEPARTMENT OF
ECOLOGY
State of Washington

Gobolka Washington wuxuu doonayaa inaad caafimaad qabto!

Waaxda Deegaanka waxaa ka go'an ilaalinta caafimaadkaaga iyo badqabkaaga. Haddii adiga mise qoyskaagu isticmaalaan indhakuusha, sida surma, kohl, mise kajal, waxaa laga yaabaa inaad la kulantaan sunta leedhka—oo ah kiimiko sababi karta dhibaatooyin caafimaad oo halis ah. Aan ka wada shaqayno sidii aan u ilaalin lahayn caafimaadka qoyskaaga iyo bulshadaada!

Indhakuusha ayaa laga yaabaa inay waxyeello u geysato caafimaadkaaga

Indhakuusha sida kohl, kajal mise surma waxay ka koobnaan karaan sun, oo ah kiimiko waxyeello u geysan karta caafimaadkaaga iyo deegaanka.

Isticmaalka indhakuusho waxay kuu keeni kartaa in jirkaagu gaaro leedh (lead), taasoo sababi karta cuncun mise canaanyo maqaarka iyo indhaha ah, sumowga leedhka, xitaa waxay saameyn ku yeelan kartaa korriinka maskaxda, gaar ahaan carruurta. Waxyaabaha aad taas ku beddelan karto waxaa ka mid ah inaad samaysato indhakuul dabiici ah mise aad ka iibsato gudaha Gobolka Washington.

Gobolka Washington wuu ku ilaalinaya

Sharciga cusub ee Gobolka ee loo yaqaan Toxic-Free Cosmetics Act (Xeerka Qurxinta aan Sunta lahayn, TFCA), wuxuu xaddidayaa soo saarista, qaybinta, iyo iibka qurxinta ay ku jiraan kiimikooyin sun ah gudaha gobolkeenna.

Ka caawi ilaalinta asxaabtaada iyo qoyskaaga

La wadaag macluumaadka—ha ahaato mid fool-ka-fool ah mise baraha bulshada—oo kor u qaad wacyiga jiilkaaga iyo kan xiga.

Baro wax intaas kasii badan:

- Ka hel ilo macluumaad oo ku saabsan beddelka alaabta, sida samaynta indhakuul adiga kuu gaar ah oo ka badbaado badan, bogga internet-ka ee Waaxda Deegaanka Sawir furaha QR-ka hoose.
- Weydii goobaha maxalliga ah ee lagu qurxiyo cidiyaha iyo timaha isticmaalka alaabta qurxinta ee ka badbaadada badan.

DEPARTMENT OF ECOLOGY
State of Washington

Helitaanka Adeegga ADA - Si aad u codsato waafajin la xiriirta ADA, kala xiriir Ecology telefoonka 360-407-6700 mise iimaylka hwtrpubs@ecy.wa.gov, mise booqo ecology.wa.gov/accessibility. Wixii Adeega Gudbinta mise TTY wac 711 mise 877-833-6341.

ecology.wa.gov/lead-in-eyeliner

Publication 25-04-021SO
Sibteembar 2026